

# Warsidaha

## Somaliland Biodiversity Foundation

AhmedAwale©.

www.somalilandbiodiversity.org | March 2020 | Tirsiga 7aad

### Tusmada Warsidaha

Socdaalkii Galxiddigaale .....	1
Jugley (Kori Bustard).....	1
Qoys dhireedka 'Apocynaceae' .....	2
Kala Duwanaanshaha Noolaha Laas Geel .....	3
Masaska Sunta leh ee Soomalilaan 5	
Shimbiraha Jaamacada Hargeysa ...	7
Aqalkii Labaad ee Badbaadada	
Harimacadm.....	9

### Noolaha Muuqaalkan Jugley ( Kori bustard)



Jugley (Kori bustard) waa shinbirta duusha ee ugu weyn Afrika. Culayska Labkeedu wuxu gaadhaa 8-20 kg, celcelis ahaanna culayskeedu waa 11 kg. In kasta oo ay duuli karaan, haddana shinbirtani waxa ay doorbiddaa orodka, jeerkaas oo ay baadadkana babbiso.

Eeg Bogga 4aad

### Guudmarka Deegaan ee Socdaalkii Galxiddigaale

Ahmed Ibrahim Awale

11-kii Feberweri, 2020, nasiib wanaag waxa aan ka mid ahaa koox sagaal qof ka kooban oo dabecadda xiiseeya (oo qaarkood ajnabi ahaayeen), kuwaas oo socdaal lug ah ku gaalaa bixiyey masaafo 78 Km ah, oo ka bilaabmaysay Dhagax-suntaalaha Laas Geel, kuna dhammaanayey Bullaxaar, oo ku taalla xeebta gacanka cadmeed. Socdaalkan qaatay Saddexda maalmood wuxu iskaga gudbay Afarta soone Juquraafi ee Soomaalilaan: Oogo, Golis, Guban-u-eege iyo Guban. Intii aanu dhex soconnay farqiga u dhaxeeya dhirta iyo xayawaanka soone kasta si fudud baanu u dareemaynay oo u arkaynay.

Mid ka mid ah muuqaallada ugu cajiibsan ee aanu aragnay intii aanu soconnay waa "Galxiddigaale", oo ah biyo fadhiisin joogto ah oo ku yaalla qarka mid ka mid ah gacannada doxa Waaheen. Magaceedu wuxu ka turjumayaa ribboonaanta biyaheeda buluugga ah ee xilliyada gudcurka ah xiddigaha cirku ku dhex sawirmaan.



Galxiddigaale waxa ku soo shubma biyaha ka yimaadda saddex meelood. Kuwa ka soo dareera silsiladda Golis, Kuwa dhanka Koonfur-Bari ee ka yimaadda buuraha Gacan libaax, Kuwa doxa Dhaboolaq ee galbeedka Hargeysa ee ku soo darsama doxa Waaheen, iyo aagga dhexe sida doxa Dhubato. Xilliyada roobka, dooxyadaasi waxa ay soo qaadaan balaayiin litir oo biyo ah oo ay badda ku daraan. Sheekooyin cajiib ah ayaa laga sheegaa galkan. Waxa ka mid ah in ay gunteedu badda u daloosho (Badda oo u jirta qiyaas ahaan 55 km dhanka waqooyi). Laakiin wax daliil ah oo arrintaa teegeraya lama hayo.

Eeg bogga 8aad

# Qoys dhireedka 'Apocynaceae' ee Somaliland

Peter Bruyns

Ogtoobar 2019, Pavel Hanáček (oo ka tirsan Jaamacadda Mendel ee Brno, Czech) iyo Aniga (Oo ka tirsan jaamacadda Cape Town, Koonfur Afrika) waxa aanu muddo laba usbuuc ah ku qaadannay Soomaalilaan si aanu ugu kuurgalno qoys dhireedka *Apocynaceae*. Waxa na wehelinayey Faysal Jaamac (Oo ka socday Xarunta kala duwanaanshaha ee Jaamacadda Hargeysa).



Bidix illaa midig : Peter Pruyns, Faisal Jama, and Pavel Hanacek

Socdaalka waxa aanu ka bilawnay Hargeysa deetana Berbera, deetana xagga Laasadacawo, Huddiso iyo Sheekh. Maalmo ayaanu ku qaadannay agagaarka Sheekh deetana waxa aanu u kacnay dhanka Gacan Libaax markii danbena Burco. Burco waxa aanu uga baxnay dhanka Waqooyi ee xagga Suuqsade, mar kalena dhanka Waqooyi Bari ee Gebogebo. Xagga Koonfureedna illaa Ceeg.



*Cynanchum rubricoronae*

Sawirrada xubnaha waxa qaaday Jamaal C.kariim, sawirrada dhirtana waxa qaaday Peter Bruyns

Intaa ka dib waanu soo noqonnay oo soo marnay Oodweyne.

Qoys dhireedka *Apocynaceae*, oo ka kooban 90 nooc, waa qoyska Lixaad ee ugu ballaadhan qoys dhireedyada Soomaalilaan. Cimilada oo qallalan awgeed kala badh noocyada qoyskani waxa ay leeyihiin jirrid biyaha u kaydisa, kuwaas oo baddankoodu ka tirsan beel berigii hore loo yaqaannay Stapeliads, oo imika dhawaan loo beddeley bahda *Ceropegia*. Xoogaa kuwa jirrida biyaha ku kaydiya ah, sida *Adenium obesum* iyo *Cynanchum viminalis*, ayaan iyagu ahayn stapeliads.



Apocynaceae: *Ceropegia malum*, a geophyte

Booqashadayada ka hor roobku aad buu u fiicnaa, sidaa darteed meel kasta oo aanu tagnaa way cagaarnayd, kuwa biyaha kaydsadaana way dher-egsanaayeen, kuwo badan oo dhirta badhida leh ahina si fiican bay u koreen. Taas baa u saamaxday in uu Faysal ururin karo dhir badan oo kuwaas ka mid ah si loogu abqaalo beerta dhironka ee Jaamacadda Hargeysa. Dhirtaa waxa ka mid ahaa *Raphionacme borenensis* iyo qaar badan oo ka tirsan xubnaha bahda *Cynanchum*.



*Glossonema revouillii*

Stapeliads-ku meelo badan oo aanu istaagnay way ka muuqdeen laakiin waxa ay aad ugu sii badnaayeen oo jaadad badan laga heleyey meelaha jararka iyo jeexjeexyada ah. Jaadadka qaar, sida *Ceropegia virchowii* iyo *C. ahmarensis* waxa ay ku koobnaayeen oo qudha figta taaggaga halka kuwo kalena ay meelo kala duwan ka baxayeen. Waxa jiray jaadad kooban oo dhagaxyada ka baxayey iyo meelaha burciidda ah marka dhanka koonfureed lagu sii siqo. Bahda *stapeliads* ee aanu aragnay in yar

Eeg Bogga 4aad

# Kala-duwanaanshaha Noolaha Ee Xayndaabka Dhagax-Suntaalaha Laas Geel

Mary E. Barkworth



Laas Geel Rock Art Reserve

Laas Geel waa goob leh sawirro si la yaab leh muuqaalladoodu u dhowrsan yihiin. Wasaaradda Gannacsiga, Warshadaha iyo Dalxiiska ayaa hadda ku hawllan xaqiijinta ilaalintooda iyo dardargelinta dalxiiska goobta. Tallaabooyinkii ugu horreeyey waxa ka mid ah in la deyro goobta si looga ilaaliyo xayawaannada waaweyn iyo xitaa dadka. Halkaa waxa ka soo baxday fursad lagu darsi karo kala duwanaansha noolaha goobta iyo sida ay uga jaawaabeen markii goobta laga xidhay culayskii daaqsinka.

Ogos 2019, Hay'adda kala duwanaanshaha noolaha Soomaalilaan (SBF) ayaa soo jeedin mashruuc ku saabsan dhanka dersidda kala duwanaanshaha noolaha gudaha xayndaabka iyo agagaarka goobta diyaarisay, taas oo ay ku wehelinayeen Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Rreer Miyiga. Gaar ahaan, hay'addu waxa ay soo jeedisay in ay diyaariso liis qoran oo ka kooban dhammaan noocyada dhirta ee xayndaabka ku dhex jira, iyada oo markaa laga diyaarin doono muuqaallo iyo buug yare ku saabsan dhirta goobta.

Daraasad hor dhac ah ayaa dabayaaqadii 2019 lagu ogaaday tiro dhir ahi ka faa'idaysteen xayndaabka la sameeyey mar haddii daaqsinkii laga xannibay. Sidoo kale doogga ayaa aad u dheeraaday marka la barbardhigo xayndaabka dibaddiisa. Axmed Cawaale

waxa isaga si gaar ah u soo jiiday in geedkii 'Duurku' (*Andropogon kelleri*), soo muuqday. Duurku wuxu ahaan jiray mid aad ugu badan Soomaalilaan.

Dhawr weji baa loo isticmaali jiray, tusaale ahaan, waxa laga samayn jiray aloonka oo aqal-Soomaaliga



gala, waxa kale oo lagu hadhayn jiray baraagaha biyaha si uummi baxa loo yareeyo. Dhanka kale waxa ulaha geedka loo adeegsan jiray qalin ahaan (qalinduur), xilligii qur'aanka looxa lagu baran jiray.

Waxa kale oo xusid mudan helitaanka geedka wacan ee 'Ulyar' (*Maytenus undata*). Geedkani sidoo kale wuu sii dabar go'ayey daaqsinka xad dhaafka ah awgeed. Waxa aanu daabacnay liiska dhirta goobta. Ka booqo: <https://OpenHerbarium.org> (see "Flora Projects/Somaliland"). Illaa haatan waxa ku jira 88 geed.

Daraasaynta SBF waxa ay khuseysey dhirta oo qudha laakiin waxa sidoo kale aanu khubaro kale ka codsannay in xog la mid ah ka diyaariyaan nooleyaa-sha kale.



Muuqaallada waxa qaaday Mary Barkworth (site), Ahmed Ibrahim Awale (*Maytenus*), Faisal Jama (*Agama*).

## Noolaha Muuqaalkan: Jugley .....

(ka yimid bogga 1aad)

Magaca Soomaaliga ah ee “Jugley” wuxu ka yimid sanqadha baadadkaas ay babbinayso.

Jugley waxa ay ahaan jirtay shinbir caan ka ah Soomaalilaan, laakiin beryahan “halis bay ku dhawdahay” (IUCN 2020). Halista ugu badan waxa ay uga imanaysaa ugaadhsashada iyo deegaankeedii oo beero, daaqsin iyo dhisme loo beddeley. Shinbirtan cidloonaysa waxa banka Ununuf oo 75 Km Bariga Hargeysa kaga beegan ku arkay Axmed Ibraahin Cawaale.

Jugleydu ma aha shinbir guurguurta laakiin waxa ay u socdaali kartaa masaafooyin dhaadheer si ay biyo iyo cunto u raadsato. Waxa ay cuni kartaa dhirta iyo xayawaanka laakiin asal ahaan waxa ay dheefsataa xayawaanka gaar ahaan cayayaanka iyo naasleyda yaryar, xammaaratada iyo shimbiraha kale. Dheefteeda waxay ku kabtaa midhaha, iyo mararka qaar xabagta geed qodaxeedka.



Waxa iyagana ugaadhsada xayawaannada ka waaweyn. Shinbirtani waxa ay ku badan tahay laba goobood oo Afrika ah: Geeska Afrika, oo Soomaalilaan ka mid tahay, Soomaaliya, Itoobiya, Kiiniya iyo Tansaaniya, iyo dhanka kale Koonfurta Afrika sida Butuswaana, Simbaabwi, Naamibiya, Angoola, Koonfur Afrika, iyo Muusambiik. Waxa jira laba nooc-hoose (Subspecies) oo shinbirtan ah. Magaca dhammayska ah ee nooca waqooyi oo ah nooca Soomaalilaan laga helo ayaa ah *Ardeotis kori struthiunculus*.

## Qoys dhireedka ‘Apocynaceae’ .....

(ka yimid bogga 2aad)

baa ubax lahayd. Badankoodu way filiqsanaayeen in kasta oo ay meelaha dhul daaqsimeedka ah ay aad ugu sii badnaayeen.

Buugga dhirta Soomaaliya (Flora of Somalia) waxa loo hawl galay intii aanay Soomaalilaan ku dhawaaqin in ay ka go’day Soomaaliya, sidaa darteed waxa muuqata in aanay waqti badan Saynisyahannadu ku qaadan Soomaalilaan marka la ag dhigo dhanka Puntland iyo Koonfurta Soomaaliya. Sidaas oo ay tahay haddana dhir badan oo qoyska *Apocynaceae*-ga ah waa laga helayaa, in kasta oo badankoodu meelo kooban ay ku arkeen. Sidaa darteed, ujeeddada koowaad ee hawshayadu waxa ay ahayd in aanu samayno aqoon fiican oo ku saabsan jaadadka qoyskan iyo sida ay Soomaalilaan ugu baahsan yihiin. Laba tusaale oo jaadadkaas ah oo aanu aqoon fiican ka helnay waa *Ceropegia watsonii* and *C. malum*.

Booqshadayada ka hor, *Ceropegia (Echidnopiis) watsonii* waxa Soomaalilaan lagu ogaa keliya muunad laga soo qaaday meel u dhaxaysa Hargeysa iyo Borama. Ha yeeshee Pavel waxa uu ku arkay meel u dhaw suuqsade. Waa meel u jirta halkii hore loogu ogaa Kiiloomitirro badan dhanka Bari, taas oo ah natiijo aan hore loo filayn.

*Ceropegia (Echidnopsis) malum* waxa lagu ogaa in uu aad ugu baahsan yahay Geeska Afrika, laakiin laba meelood oo keliya ayaa Soomaalilaan lagu arkay. Meel u dhaw Maydh iyo meel kale oo Huddisa u dhaw. Waa geed aan aad u muuqan oo inta badan ka hoos baxa dhirta oo laamihiisa badh ka mid ah ciidda ku aasa. Xilliga abaaraha, laamihiisu waa ay madoobaadaan, iyaga oo u eegaada jirrid gubatay, waxana daboosha ciidda. Xilliyada roobka laamuhu waa ay soo kobcaan iyaga oo ciddii dul tuulnayd iska tuuraya isla markaana cagaar noqonaya, taas oo ka dhigaysa wax muuqda. Roobabkii ka horreeyey safarkayaga ayaa muujiyey in uu geedku ku badan yahay Soomaalilaan. Waxa aanu ku aragnay meel kasta oo aanu istaagno oo buuraha waqooyiga ah iyo sidoo kale taagagga ku hareeraysan Hargeysa.

# Masaska Sunta Leh ee Soomaalilaan

Tomáš Mazuch

Masaska sunta leh waxa ay ka tirsan yihiin bahda *Serpentes*. Dhammaantood waxa ay soo saaraan sun, taas oo ay u isticmaalaan in ay ku ugaadhsadaan, ku dheefshiidaan cuntadooda, ama isku difaacaan. Sunta inta badan waxa ay soo daayaan marka ay ku mudaan micida dheer, in kasta oo qaarkood aanay lahayn miciyo hagaagsan. Maska suntan leh oo dhama dadka khatar uma aha. Si ay khatar u noqdaan waa in ay soo daayaan sun badan oo xooggan waana in ay yeeshaan miciyo la sheegi karo.

Soomaalilaan waxa laga helaa illaa 52 nooc oo mas ah. Kuwaas oo kala badh leh sunta (= Qanjidhada sunta soo daaya), laakiin 12 kuwaas ka mid ah ayaa halis ku keeni kara dadka (Table 1). Taas oo la macno ah in ay soo saari karaan sun ku filan oo xooggan si ay halis u geliso nolosha dadka iyo in ay leeyihiin miciyo fidsan oo ay wax ku mudi karaan. Masaska kale ee sunta leh waxa aanay lahayn mid ka mid ah labadaas walxood.

12 mas ee ugu khatarsan waxa ka mid ah *Hydrophis platurus* (Mas badeed bog-huruudle ah). Noocan aad looma arko waayo noloshiisa inta badan wuxu ku qaataa biyaha badda, sida Gacanka Cadmeed. Sidaa darteed aad looma arko.

Nooca aad dhulka ugu baahay ee ugu khatarta badan Soomaalilaan waxa ka mid ah afarta nooc ee bahda *Atractaspis*, ee hoggaga qota. Iyaga oo sidaas ah ma sababaan qaniinyooyin badan waayo inta badan waxa ay soo baxaan habeenkii, sunta way sii daayaan, inta badanna waxa ay ku nool yihiin godad dhulka hoostiisa ah.

Laba nooc oo ballaadhan, laakiin aan aad u faafin, oo Soomaalilaan laga helo waxa ay kala yihiin Black Mamba (*Dendroaspis polylepis*) and Boomslang (*Disphodelis typus*). Nooca hore dhererkiisu wuxu gaadhaa illaa 3.2 mitir, laakiin dadka wuu ka dhuuntaa waanu dheereeyaa. Dhulka Oogada iyo Hawd ayuu

caan ka yahay. Dhirta iyo Dhulka labadaba wuu ku nool yahay. Ma ogi wax dabagal ah oo beryahan danbe lagu sameeyey, laakiin marka qudha ee uu wax weeraraa waa marka uu khatar dareemo iyo in uu halis dhexda ugu jiro.

Nooca 'Boomslang' wuu ka yar yahay, celcelis ahaan waa 1.2 –


1.5 mitir, dherer ahaan, mararka qaarna wuxu gaadhaa 2.1 mitir. Gebi ahaanba wuxu ku dul nool yahay geedaha, maalintii buu soo jeedaa, caadi ahaanna ma gardarro badna. 1949-kii ayuu Parker Hargeysa ku diiwaangeliyey, laakiin anigu ma ogi dabagal cusub oo lagu sameeyey iyo qaniinyo cusub oo laga soo sheegay. Sawirkani waa mid qaangaadh ah oo midab cagaaran. Waxa ay maraan wejiyo badan oo kala midab ah.

Noocyada kale ee bahda '*Elapidae*' waxa ka mid ah '*Naja pallida*', Kobraha candhuufta cas iyo 'Naja haje', Kobraha qaniinyo masaariga ah, oo labadooduba halis noqon kara, laakiin Kobraha candhuufta cas wuxu sidoo kale tufi karaa sunta.

Kobraha candhuufta cas caan buu ka yahay Soomaalilaan, wuxuna ku nool yahay badiba gobollada. Wuxu gaadhaa 1.5 mitir dhererkiisu. Ka sakaw magaciisa, inta badan waa bunnii saytuuni ah, midab ahaan, in kasta oo muunadaha dhanka Koonfureed ee Geeska Afrika ay inta badan casaan yihiin. Sannadihii u danbeeyey wuxu sababay dhibaatooyin soo noqnoqday.



*Lamprophiidae: Atractaspis fallax*



*Elapidae: Dendroaspis polylepis*

## Masaska Sunta Leh ee Soomaalilaan.....

Kobraha Masaaridu wuu adag yahay in aad ka garato kan Kobraha Candhuufta Cas, marka laga reebo in kobraha masrigu uu jidhifo ku leeyahay hareeraha indhaha. Wax yar baa laga og yahay faliqsanaantiisa Soomaalilaan laakiin inta badan muunadaha waxa laga heley buuraha dhanka Oogada.



Colubridae: *Disphodelus typus*

Saddexda nooc ee soo hadhay ee kuwa sunta tufa ee Soomaalilaan

dhammaantood waa qoyska 'Viperidae'. Waxa loogu yeedhaa "Abeeso", Soomaalilaan ahaan. Midi waa '*Bitis arietans somalica*', waa nooca abeeso ee Afrika ugu weyn, mararka qaar waxa ay gaadhaa 1.85 mitir, in kasta oo badankoodu ka gaaban yihiin. Soomaalidu waxa ay ugu yeedhaan "Abguri".



Elapidae: *Naja pallida*

Way ku baahsan tahay oo waa ka caan badiba dhulka Soomaalilaan iyo meelo badan oo Afrika ah. Waxa ay ii sheegeen in inta badan ay ku arkaan degsiimooyinkooda. In kasta oo ay sidaas tahay haddana dhawaanahan ma maqal warbixinno sheegaya qaniinyooyin ay Soomaalilaan ka geysteen.



Elapidae: *Naja pallida*



Elapidae:  
*Naja haje*



Elapidae: *Naja haje*

Labada abeeso ee kale ee Soomaalilaan laga helaa waa '*Echis hughesi*' iyo '*Echis pyramidum*', oo ay Soomaalidu u yaqaannaan "Abeeso". Waa masas

yaryar, oo kooda ugu dheeri gaadho 80 cm. Ka hore waxa laga helaa Sanaag iyo Sool, waxa se aad ugu caan ah Puntland iyo Gobalada Dhexe ee Soomaaliya. Ma maqal warbixinno dhaw oo la xidhiidha qaniinyo ay geysteen.



Viperidae: *Bitis arietans somalica*

Nooca labaad waa halis oo aad baa looga baqaa. Waxa laga helaa dhulka Gubanka ee Soomaalilaan, Jabuuti illaa Puntland, oo raacsan ee xeebta Gacanka Cadmeed. Waa habeen noole laga helo inta badan dhulka kulul, joog ah 0-900 m. Waa nooc yaryar laakiin halis badan oo aan dadka gefin.



Viperidae: *Echis pyramidum*

Marka la soo koobo: iyada oo laga duulayo kuurgal farobadan inta badan qaniinyooyinka Soomaalilaan waxa sababa laba nooc "Abeesada" ee ku nool dhulka kulul ee xeebaha ah iyo nooca kale ee ah Kobraha Candhuufta Cas ee caanka ka ah dhulka buuralayda ah iyo wixii ka rogan. Labada nooc ee 'Boomsland' iyo 'Black Mamba' cabbirkooda marka laga yimaaddo haddana wax yar bay sababaan.

### Tixraac:

Parker, H.wW. (1949), The snakes of Somaliland and the Sokotra Islands. Zoologische Verhandelingen 6: 1-115.

Wikipedia (2020). [https://en.wikipedia.org/wiki/Venomous\\_snake](https://en.wikipedia.org/wiki/Venomous_snake). Accessed 23 February 2020.

Images by Tomáš Mazuch except *Naja pallida* from Ethiopia by Pavel Novak and *Naja haje* (whole animal) by Ahmed Kadleya.

# Shimbiraha Jaamacadda Hargeysa

Osman Gedow Amir

Shimbiruhu waxa ay ka mid yihiin qayb muhiim ah oo muuqata oo nolosha dunida ah. Waxa lagu yaqaanaa awoodda ay u leeyihiin in ay ka digaan khatarta deegaanka. 1911-kii macdan qodayaashu waxa ay bilaa-been in ay shimbiro dhulka hoostiisa u sii qaataan, waayo waa ay ka hor dareemi og yihiin hawada sunta ah bani'aadamka. Haddii shimbirku dhinto deeto macdan qodayaashu si degdeg ah ayey godka uga bixi jireen. Rachel Carson ayaa bilawday buug ay u bixisay 'Gu'ga Aamusan' (Silent Spring), Wuxu ahaa buuggii sababta u ahaa in la joojiyo sumihii cayayaanka ee aan kala sooca lahayn, iyada oo ka jawaabaysay warqad ku saabsan dhimashadii shimbiraha ee goob lagu buufiyey sunta DDT oo kaneeco lagu laynayey. Maanta waxa la taxliiliyaa macluumaad muddo dheer ah oo ku saabsan tirada shimbiraha iyo is beddelka heerar-kooda. Tirada shimbiraha iyo kala duwanaanshahoodu waxa ay ku qotontaa kala duwanaanshaha deegaanka dunida, waxana ay isla beddeshaa isbeddelka deegsiimooyinka ku yimaadda.

24-kii Feberweri, 2020, Aniga iyo Faysal Jaamac oo ka tirsan xarunta kala duwanaanshaha noolaha ee Jaamacadda Hargeysa, waxa aanu samaynay tiro-koob ku saabsan shimbiraha jaamacadda Hargeysa. Waxa ay nagu qaadatay Laba saacadood iyo shan iyo toban daqiiqo in aanu ku dhammayno hawsha tirinta shimbiraha aanu jaamacadda ku aragnay. Waxa aanu garannay 20 nooc oo shimbiro ah, waxa aanu se samaynay 44 u kuur gal intii aanu hawsha ku gudo jirnay. Hawlgallada xiga, gaar ahaan haddii la sameeyo xilliyo kala duwan oo sannadka ah, waxa hubaal ah in ay kordhi doonto tirada shimbiraha ee goobta lagu arki doono.

**Shimbiraha aanu ku dhex diiwaangelinnay jaamacadda Hargeysa 2020-02-24**

## **Qoyska: Accipitridae**

White backed Vulture, (*Gyps africanus*)

## **Qoyska: Columbidae**

Speckled Pigeon (*Columba guinea guinea*)

Namaqua Dove (*Oena capensis capensis*)

Red eyed Dove (*Streptopelia semitorquata*)

Ring-necked Dove (*Streptopelia capicola somalica*)

Laughing Dove (*Streptopelia senegalensis senegalensis*)

## **Qoyska: Apodidae**

Little Swift (*Apus affinis affinis*)

## **Qoyska: Upopidae**

Eurasian hoopoe (*Upupa epops epops*)



Upopidae: *Upupa epops epops*

## **Qoyska: Hirundidae**

Eurasian Barn swallow (*Hirundo rustica rustica*)

Ethiopian swallow (*Hirundo ethiopica amadoni*)

## **Qoyska: Pycnonotidae**



Somali Bulbul  
(*Pycnonotus barbatus somaliensis*)

Ploceidae: *Ploceus galbula*

## **Qoyska: Muscicapidae**

Pied wheatear (*Oenanthe pleschanka*)

## **Qoyska: Corvidae**

Cape crow (*Corvus capensis kordofanensis*)

Muuqaallada waxa qaaday Osman Gedow Amir

## Guudmarka Deegaan ee Socdaalkii Galxiddigaale..... (ka yimid bogga 1aad)

Nasiib baanu lahayn. 2019 sannad biyo badan buu ahaa. Qaybtii hore ee Diisambar waxa la diiwaan geliyey illaa siddeed dabaylood oo duufaantii kulaaleyaasha ee Pawan figtoodii ahayd. Taasi waxa ay lid ku ahayd sannadihii ka horreeyey oo abaaro ahaa. Saamayntu waxa ay ka muuqatay dhirta. Si kastaba, sannadihii abaaraha ahaa oo lagu daray culayska daaqsinka ayaa keenay hoos u dhac ku yimid dhirta xooluhu cunaan, gaar ahaan doogga, taas oo sababtay is beddel dhanka geed daaqsimeedka ah. Tusaale ahaan, geedka 'Gagaboodka' (*Iphia rotundifolia*) ayaa la wareegay dhul aad u badan, isaga oo meesha ka saaray geed gaab iyo doog badan oo daaqsin ahaa.



*Euphorbiaceae: Euphorbia inculta*

In kasta oo aanan doonayn in ay iga tagaan wehelkeygu, taasi se iga may joojin inaan ku il-doogsado hodantinimada noolayaasha aanu jidka ku sii dhaafaynay. Noocyada noole ee tirada ugu badan ka aragnay waxa ka mid ahaa *Euphorbia inculta* ('Dibow') agagaarka Galxiddigaale. Sidoo kale, kama hakan in aan soo qaado muunadda *Odontanthera radians* ('Sobkax'), oo ka tirsan qoyska *Apocynaceae*, oo laga helo sooneyaasha Guban-xigeenka iyo Gubanka ah ee Soomaalilaan. Waxa aan sidoo kale soo qaaday muunadda geed kale oo isla qoyskaas ah, oo aan bilawgii moodnay nooca *Glossonema varians*, oo Bariga dhexe iyo Eeshiyada dhexe lagu

ogaa, laakiin caleemo ka duwan leh. Waxa aanu khubarada la kaashan doonnaa aqoonsiga geedkaas.



*Apocynaceae: Glossonema sp.*

Muuqaallada waxa qaday Ahmed Ibrahim Awale

Banka ballaadhan ee u dhaxeeya Faruur iyo Bullaxaar waxa ugu badan *Balanites rotundifolia* ('Kulan') uu ku dhex filiqsan yahay *Boscia miminifolia* ('Maygaag'), waxa se hoos u dhac ku yimid geedkii *Vachellia tortilis* ('Qudhac') marka la barbar dhigo 2006-dii oo aan sameynayey daraasad ku saabsan is beddelka cimilada iyo saamaynta gubanka Soomaalilaan.

Buuro aad u qurux badan, oo leh muuqaallo gaar ah, oo ka qotomay dhulka aanu lugaynaynay, ayaa maskaxdayada iyo muruqyadaydii daallanaa hadba gelinayay tamar cusub, safarkana u yeelayey xiiso weyn. Duurjoogtii aanu arkaynay waxa iyagana ka mid ahaa Cawl, Garanuug, Sakaaro, Bakayle, Bawne, Dawaco, Diin, Daanyeer, iyo tiro kale oo bahda xamaaratada ka mid ah.

### Tixraac

Perennial Plant Mortality in the Guban Areas of Somaliland, Candlelight/Heinrich Boell Foundation Study (2011).

Proliferation of Honey Mesquite (*Prosopis juliflora*) in Somaliland, Candlelight study (2006)



## Aqalkii Labaad ee Badbaadada Harimacadka

*Mary E. Barkworth*

1-dii Maarj, 2020, Laurie Marker, Agaasimaha iyo aasaasaha Sanduuqa Badbaadada Harimacadka ee (CCF), Iyo Wasiirka Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Miyiga, Shukri X. Baandare, iyo Madaxweyne ku Xigeenka Soomaalilaan, Cabdiraxmaan Saylici, oo munaasibadda lagu sharfay, waxa ay si rasmi ah u fureen gurigii labaad ee badqabka Harimacadka.



Laura Marker


Gurigan labaad wuxu koobsanayaa laba wax oo muhiim ah: Wuxu leeyahay barxad ballaadhan oo ay



Wasiir Shukri iyo M. Ku xigeenka Saylici

dhallaalka yaryar ku ciyaari karaan iyo sidoo kale goob lagu tababari karo dadka lagu siin karo dhammaan wixii xirfad ah ee fayobida harimacadka la soo badbaadiyey. Sida ay Marker sharraxday “Ujeeddadu waa in la helo dhakhaatiir maxalli ah iyo daryeelayaal bixin kara adeegga iyada oo aan 100% cidi dabada ka riixayn”. Dhallaalka la soo badbaadiyaa inta badan waxay ku jiraan xaalad xun, oo waxa ay la soo kulmaan xaalado fuuqbax, macaluul, xanuunno, lafo jab, iyo dhibaatooyin kale iskugu jira. Baahidooda ugu horaysaa waa in judhaba la siiyo kaalmo caafimaad laakiin waa in loo sii raaciyo daryeel waqti dheer ah. Gurigan labaad wuxu markaa muhiim u yahay in uu Soomaalilaan ka caawin doono daryeelka iyo maaraynta mid ka mid ah dhaxalka noole ee dalkan, kuwa ugu muhiimsan.

Xafladda waxa laga soo jeediyey hadallo kala duwan markii danbena waxa socod lagu dhex maray aqalka. Madaxweyne ku xigeenka, Cabdi Raxmaan Saylici ayaa ku nuuxnuuxsaday baahida loo qabo in la joojiyo ka ganacsiga sharci darrada ah ee duurjoogta. Sidoo kale wuxu u mahad naqay dhammaan dadkii dedaalka ku bixiyey in ay suurto geliyaan hawshan isaga oo ballanqaaday in dawladduna dhankeeda sii wadi doonto wada shaqaynta iyo dedaalka.



Cheetahs in Ancient Egypt

Koontarabaaninta dhallaalka Harimacadka waxa dabada ka riixaya qiimaha ay ka leeyihiin Khaliijka Carabta halkaas oo looga tixgeliyo in ay yihiin astaan sharafeed. Muhiimaddaasi ma cusba. Waxa ay ku xardhan yihiin taariikho hore sida boqortooyadii Masar (Qarniyadii 16-aad illaa 11-aad ee Ciise Hortii) iyo sidoo kale aasaar ka danbeeyey oo qaarkood tilmaamaya in xitaa maamulladu isku hadiyeyn jireen.

Mushkiladdu waa in tirada Harimacadka duurka ku jiraa uu hoos ugu dhacay si xawli ah. Horraantii 1900-kii, tirada Harimacadka waxa lagu qiyaasay 100,000. Maantana waa illaa 7000. Haddii aan la helin dedaallo

Muuqaallada waxa leh Cheetah Conservation Fund (Laura Marker & tour), Waxa muuqaalka (Cheetahs in Egypt) laga qaatay Wikipedia.

badbaadineed oo damiir hagayo, waxa ay halis ugu jiraan in ay dabar go'aan. Halista kale ee Harimacadku waa in deegaankiisii baaba'ayo. Waxa ay ku noolaan karaan deegaammo badan haddii uu ka helo cunto ku filan oo cadawgiisu yar yahay. Deegaanka ugu macquulsan waa meelaha aadka u furan laakiin leh meelo dedan. Taas baa u saamaxda in uu Harimacadku in uu ugaadhiisa eryan karo isaga oo yaraynaya dhankiisa khatarta kaga iman karta xayawaannada isaga halista ku ah.

## Kala-duwanaanshaha Noolaha Ee Xayndaabka Dhagax-Suntaalaha Laas Geel... (ka yimid bogga 3aad)

Cusmaan Geedaw iyo Tomas Mazuch, labaduba, ar-rinka way soo dhaweyeen. Cusmaan oo hore xog ugu darsaday buugga dhirta Soomaaliya ee 'Ashe and Miskell's (2013) Birds of Somalia' ayaa goobta booqday Noofember 2019, xog shimbiraha goobta uu ku arkayna nala wadaagay, wuxu sidoo kale balanqaaday in marar kalena ku noqon doono goobta. Tomas Mazuch isaguna wuxu judhiiba soo diray liiska xammaaratada, berri-biyoodka, Dib-qalloocyada iyo naasleyda uu goobta ku arkay intii u dhaxaysay 2010 illaa 2017. Labada liisba waxa laga heli karaa Open-ZooMuseum.org. Ku sii dhufo "Flora projects/Somaliland". Haa, bartaas kelmedda "Flora" waxa dhawaan lagu beddeli doonaa "Fauna". Si aad u aragto liisaska xayawaanka oo idil, dooro "Laas Geel Fauna—all taxa".



Laas Geel Rock Art Reserve

Saddexdaas liis waxa ay ku jiraan tallaabooyinkii ugu horreeyey ee diyaarinta.

Mustaqbalka wax cusub baa lagu sii dari doonaa, shaki la'aan. Wuxuun baan xoojinayaa: liisaska oo qudhi ma aha muhiimaddayada koowaad, laakiin waa tallaabooyinka ugu muhiimsan, marka la diyaarinayo xogta ku saabsan kala duwanaanshaha noolaha Soomaalilaan, ee loo isticmaali doono in ay bartaan dugsiyada, kulliyadaha, wasaaradaha iyo dadweynuhu.

## Aqalkii Labaad Ee Harimacadka.....

(ka yimid bogga 9aad)

Samaynta aqallo lagu daryeelayo uma soo celinayso deegaankiisii ku habboonaa, laakiin waxa ay muhiim u tahay badbaadinta xayawaankan waxana ay kordhinaysaa fursadaha ay dadku ku baran karaan xayawaankan xiisaha leh.

### Tixraac:

Cheetah Conservation Fund. 2020. Joint press release by CCF and MoERD, 2 March 2020.

Wikipedia. 2020. Cheetah. <https://en.wikipedia.org/wiki/Cheetah> Accessed 21 March 2020.

## Shimbiraha Jaamacadda.... (ka yimid bogga 7aad)



Columbidae: *Streptopella semitorquata*

### Qoyska: Sturnidae

Greater Blue-eared Starling (*Lamprolornis chlybaeus cyaniventris*)

### Qoyska: Passeridae

Swainson's Sparrow (*Passer swainsonii*)

### Qoyska: Ploceidae

Ruppell's Weave  
(*Ploceus galbula*) Northern Chestnut Weaver  
(*Ploceus rubiginosus rubiginosus*)

Qoyska: Estrildidae Red-billed Firefinch (*Lagonosticta senegala somaliensis*)



## Nagala Soo Xidhiidh

Web Site: <http://somalilandbiodiversity.org>

Email: [mary.barkworth@gmail.com](mailto:mary.barkworth@gmail.com)

Mailing Address: Somaliland Biodiversity Foundation, 397 Lauralin Drive Logan, UT 84321

Physical address in Somaliland: University of Hargeisa

